# Xubinta - Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo

**Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ee loogu talagalay Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah (Young Adults with Special Health Care Needs, YSHCN)**

Dukumeentigan wuxuu jawaabo ka bixinayaa su’aalaha caamka ah ee ku saabsan barnaamijka Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah ee Qorshaha Caafimaadka Oregon.

## Jadwalka Tusmada

**Xubinta - Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo ........................................................... 1**

1. Waa maxay barnaamijka Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah?.................................................................................................... 3
2. Goormuu barnaamijka cusub bilaabmi doonaa? ................................................ 4
3. Muxuu barnaamijka Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah daboolaa?........................................................................................... 4
4. Sidee baan u codsadaa YSHCN?........................................................................ 4
5. Sidee baan ku ogaan karaa haddaan u qalmo YSHCN? .................................. 5
6. Da’dee ayuu qofku ugu qalmi karaa YSHCN?.................................................... 5
7. Sidee qofi u heli karaa taageerooyinka HRSN (Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka)? ....................................................................................................... 5
8. Codsadayaashu ma qasabaa inay noqdaan madaxda qoyska, mise waxay noqon karaan kuwo xubnaha kale ee qoyska ku tiirsan?........................................... 6

9. Miyaa deegaanka la dagan yahay uu saameeyaa u-qalmitaanka? Ma jiraan ka reebitaano loogu tala galay codsadeyaasha ku nool daryeelka korinta ee dadka qaangaarka ah, guryaha daryeelka ee dadka qaangaarka ah, ama xarumaha wax lagu daweeyo ee la dago? .......... 6

10. Ma heli karaa dheefaha YSHCN? .......... 6

11. Sideebaa qof xubin ah uu ku ogaan karaa in laga diiwaan gashay barnaamijka YSHCN? .......... 6

12. Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay inaan bixiyo si aan ugu qalmo YSHCN? .......... 7

13. Miyaa xubnaha YSHCN looga baahan yahay inay iska diiwaangaliyaan ururada daryeelka la isku duway CCOs? .......... 7

14. CCO-yadu ma saameeyaan helitaanka adeegyada? Ma jiraan habab kala duwan oo lagu helo adeegyada ayadoo lagu salaynaayo CCO-ga qofku ka diiwaangashan yahay? .......... 8

15. CCO-yadu si madax-bannaan ma u go'aamin karaan mudnaan siinta adeegga? CCO-yadu si madax-bannaan ma u go'aansan karaan sida ay u kala soocaan, sida inay dadka ugu adeegaan sida ay usoo kala horreeyaan ama in ay ogolaadaan shuruudo gaar ah oo "looga boodi karo khadka"? .......... 8

16. Sidee ayay tani u saamaysaa xaddidaadyada caafimaadka hab-dhaqanka, halkaasoo adeegyadu ay inta badan waqti ku xaddidan yihiin? .......... 8

17. Miyey tahay inaan cusboonaysiiyo dheefahayga YSCHN? .......... 9

18. Sidee dib u cusboonaysiinta dheefaha YSHCN u shaqeysaa? .......... 9

19. Waa maxay sababta YSHCN u dhammaato? .......... 9

20. Miyaa YSHCN loo isticmaali karaa cayminta daryeelka muddada dheer? .......... 10

21. Ma heli karaa YSHCN haddaan leeyahay caymin Healthier Oregon? .......... 10

22. Sidee baan jawaabo ku heli karaa haddaan qabo su’aalo dheeraad ah? .......... 10

23. Ma jiraan xeerar ku saabsan wakhtiyada jawaabta adeegga? Ma jiraan wax ka mid ah xeerarka oo ku saabsan wakhtiga shaqada lagu qabanayo ee u dhexeeya codsiga taageerada iyo bixinta adeegyada? ...................................................... 10

## 1. Waa maxay barnaamijka Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah?

- Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waa barnaamij cusub oo siiya Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) dadka da'doodu tahay 19 ilaa 25 ee qaba xaaladaha caafimaadka qaarkood. Xaaladaha caafimaadku waxay ahayd inay bilowdeen 19 jirka kahor. Waxaa waajib ah in dakhligaagu yahay ama ka hooseeyo 205% ee Heerka Saboolnimada Fadaraalka (FPL) si aad ugu qalanto. Waxaad haysan kartaa barnaamijkan kalidii ama caymiska dheeraadka ee OHP ahaan.

| Tirada Qoyska | 205% FPL ee 2024 |
|---|---|
| **1** | $2,573 bishii |
| **2** | $3,492 |
| **3** | $4,411 |
| **4** | $5,330 |

- Dheefaha YSHCN ee cusub waxay kaa caawin karaan inaad hesho daryeelka aad u baahan tahay markaad u wareegayso dheefaha dadka waawayn ee OHP. Barnaamijku sidoo kale wuxuu leeyahay xadad dakhli oo sarreeya marka loo eego barnaamijyada kale ee OHP. Sidaas ayey dhallinyaro fara badan oo qabta baahiyaha daryeelka caafimaadka ee gaarka ah u heli karaan una haysan karaan cayminta OHP.

## 2. Goormuu barnaamijka cusub bilaabmi doonaa?

- Barnaamijku wuxuu bilaabmayaa Janaayo 1, 2025. Dadka da'doodu tahay 19 iyo 20 ayaa laga yaabaa inay u qalmaan sannadka 2025.

## 3. Muxuu barnaamijka Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah daboolaa?

- Cayminta Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waa Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Sidoo kale wuxuu daboolaa waxyaalo badan marka loo eego barnaamijyada OHP ee kale ee dadka waawayn. Tusaale ahaan, adeegyada araga iyo ilkaha oo dheeraad ah, iyo dhammaan daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah iyo daryeelka caafimaad ahaan habboon. Dadku sidoo kale waxay heli karaan dheefaha Baahiyaha Bulsheed ee Caafimaadka la Xiriira. Dadka u qalma dheefaha Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waa in loo cusboonaysiiyaa 2-dii sanaba mar.

## 4. Sidee baan u codsadaa YSHCN?

- Haddaad hore u lahayd Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) marka barnaamijku bilawdo Janaayo 2025, aad tahay 19 ama 20 jir, oo dakhligaagu ka hooseeyo 205% ee Heerka Saboolnimada Fadaraalka (FPL), waxaanu kuu soo diri doonnaa waraaq lagugu waydiinayo su'aalo ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka. Haddaad buuxiso oo aad soo celiso waraaqdan, waxaanu arki doonnaa haddaad u qalanto oo waxaan kuu soo diri doonnaa waraaq ku saabsan u qalmiddaada. Sidoo kale waxaanu isticmaali karnaa macluumaadka aanu hayno ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka si aan u ogaanno haddaad u qalanto.
- Sidoo kale waxaanu isticmaali karnaa macluumaadka horayba aanu u haynay si aan u ogaanno haddaad u qalanto. Haddaanu ogaano inaad u qalanto, waxaanu kuu soo diri doonnaa ogaysiis oo aanu si otomaatig ah kaaga diiwaangalin barnaamijka. Fadlan cinwaankaaga wixii iska beddela kolba nala socodsii si farriimaha aanu kuu soo dirayno aad u hesho.

- Waxaad ku ogaan kartaa haddaad u qalanto dheefaha YSHCN markasta inaad buuxiso arjiga OHP.

## 5. Sidee baan ku ogaan karaa haddaan u qalmo YSHCN?

- Ma aha khasab inaad ka diiwaangashan tahay Qorshaha Caafimaadka Oregon si aad ugu qalanto. Laakiin waa inaad buuxiso shuruudahan:
- Da'da: Laga bilaabo Janaayo 1, 2025, barnaamijka YSHCN waxa loogu talogalay dadka da'doodu tahay 19 iyo 20.
- Dakhliga: Dakhliga qoyskaaga soo galaa kama badnaan karo 205% ee heerka saboolnimada fadraalka (ilaa aad horeyba ugu qaadanaysay barnaamijka OHP heer dakhli oo ka sarreeya moojee).
- Xaaladaha caafimaadka: Waxaad leedahay jirro dabadheeraatay oo adag, xaalad caafimaadka habdhaqanka ah, ama waxaa lagaa helay naafonimo soo bilaabantay intaadan gaarin 19 jir.

## 6. Da'dee ayuu qofku ugu qalmi karaa YSHCN?

- Dheefaha Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waxay bilaabmaan 19 jirka. Waxaanu kuu sheegi doonnaa inaad ka jawaabto su'aalo baaris dalabkaaga OHP laga bilaabo 17 jirka. Sidaas darteed, haddaad u qalanto, waxaanu si otomaatig ah kuu diiwaangalin markaad gaarto 19 jir. Fadlan cinwaankaaga wixii iska beddela kolba nala socodsii si farriimaha aanu kuu soo dirayno aad u hesho.

## 7. Sidee qofi u heli karaa taageerooyinka HRSN (Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka)?

- Xubnaha YSHCN waa laga baaraa baahiyaha HRSN
- Baaritaanka ka dib, waxaa loo gudbiyaa barnaamijka HRSN si loogu sameeyo qiimeyn buuxda iyo diiwaangelin

## 8. Codsadayaashu ma qasabaa inay noqdaan madaxda qoyska, mise waxay noqon karaan kuwo xubnaha kale ee qoyska ku tiirsan?

- Codsaduhu wuxuu noqon karaa madaxa qoyska ama ku tiirsane.

## 9. Miyaa deegaanka la dagan yahay uu saameeyaa u-qalmitaanka? Ma jiraan ka reebitaano loogu tala galay codsadeyaasha ku nool daryeelka korinta ee dadka qaangaarka ah, guryaha daryeelka ee dadka qaangaarka ah, ama xarumaha wax lagu daweeyo ee la dago?

- Haa, deegaanka lagu sugan yahay wuxuu saameeyaa helitaanka adeegyada qaarkood
- Liiska goobaha/adeegyada ayaa laga heli doonaa mareegta YSHCN
- Helitaanka adeeggu waxaa uu ku xiran yahay baahida adeegga gaarka ah

## 10. Ma heli karaa dheefaha YSHCN?

- Waxaad ku ogaan kartaa inaad gasho xisaabta ONE Online oo aad eegto macluumaadkaaga dheefta ee bogga hore. Ama, waxaad la xiriiri kartaa 800-699-9075 (dhammaan wicitaanada gudbinta waa la qabanayaa. Caawimo waxa lagu heli karaa luuqado badan).

## 11. Sideebaa qof xubin ah uu ku ogaan karaa in laga diiwaan gashay barnaamijka YSHCN?

- Kuwa ku jira OHP ka hor intaysan gaarin 19 sano jir ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka: Waxay helaan warqad OHP ka socota oo caddeyneysa inay u qalmaan lana diiwaangaliyay, isla markaana ay ku qoran yihiin dheefaha la heli karo

- Codsadayaasha cusub ee OHP: Kadib markay dhamaystiraan arjiga baaraha iyo OHP, waxay helayaan ogaysiis ku saabsan u qalmida OHP iyo YSHCN labadaba, kaas oo ay ku qoran yihiin dheefaha la heli karo

## 12. Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay inaan bixiyo si aan ugu qalmo YSHCN?

- Markaad xeraynayso arjigaaga OHP, waxaanu su'aalo kaa waydiin doonnaa baahiyahaaga daryeelka caafimaadka, laakiin ku waydiin mayno su'aalo gaar ah oo ku saabsan waxa lagaa helay. Kuma khasbanid inaad ka jawaabto su'aalahan. Laakiin haddaadan ka jawaabin, ma garan karno haddaad u qalanto iyo haddii kale.
- Sidoo kale waxaanu isticmaali karnaa macluumaadka horayba aanu u haynay si aan u ogaanno haddaad u qalanto. Haddaanu ogaano inaad u qalanto, waxaanu kuu soo diri doonnaa ogaysiis oo aanu si otomaatig ah kaaga diiwaangalin barnaamijka. Fadlan cinwaankaaga wixii iska beddela kolba nala socodsii si farriimaha aanu kuu soo dirayno aad u hesho.
- Da'yarta qaarkood ayaa ogaaday inay u faa'ido badan tahay inay helaan macluumaad ku saabsan baahiyahooda daryeelka caafimaadka, ama waalid, daryeele, ama taageere la joogaa inuu ka jawaabo su'aalaha.

## 13. Miyaa xubnaha YSHCN looga baahan yahay inay iska diiwaangaliyaan ururada daryeelka la isku duway CCOs?

- Dadka u qalma dheefaha Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waxaa waajib ah inay iska diiwaangaliyaan Ururada Daryeelka la Isku Duway (CCO). Hase yeeshee, dadka qaar waa laga dhaafi karaa hadday qabiil ka tirsan yihiin ama ku jiraan caymin caafimaad oo gaar loo leeyahay.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxay yihiin ururada daryeelka la isku duway, siday caawimo u bixin karaan, iyo si aad isku barbardhigi karto qorshayaasha, guji halkan.

## 14. CCO-yadu ma saameeyaan helitaanka adeegyada? Ma jiraan habab kala duwan oo lagu helo adeegyada ayadoo lagu salaynaayo CCO-ga qofku ka diiwaangashan yahay?

- Maamulka isku-duwidda daryeelka way ku kala duwan yihiin CCO-yadu, taas oo saamaynaysa qofka xubinta ah waxa uu la kulmayo
- Si kastaba ha ahaatee, dhammaan xubnaha OHP ee ka diiwaangashan YSHCN waxay xaq u leeyihiin daryeel isku heer ah iyada oo aan loo eegeyn diiwaangelinta CCO ama xaaladda kharashka loogu tala galay adeegga

## 15. CCO-yadu si madax-bannaan ma u go'aamin karaan mudnaan siinta adeegga? CCO-yadu si madax-bannaan ma u go'aansan karaan sida ay u kala soocaan, sida inay dadka ugu adeegaan sida ay usoo kala horreeyaan ama in ay ogolaadaan shuruudo gaar ah oo "looga boodi karo khadka"?

- YSHCN waa mutaysi Medicaid. Haddii dadku u qalmaan diiwaangelinta oo ay u baahan yihiin daryeel, waa inay helaan daryeelkaas
- Isbaddal weyn: Haddii qofi isdiiwaan gasho isagoo jira da'da 20 oo uu gaaro 21, wuu kusii jirayaa YSHCN
- Daryeel kasta oo hoos yimaada EPSDT lama diidi karo xitaa ka dib marka uu gaaro 21 jir
- Tani waxay ka dhigan tahay isbeddel weyn oo ku yimid bixiyeyaasha iyo sida daryeelka loo bixiyo

## 16. Sidee ayay tani u saamaysaa xaddidaadyada caafimaadka hab-dhaqanka, halkaasoo adeegyadu ay inta badan waqti ku xaddidan yihiin?

- Haddii daryeelka aan loo baahnayn wixii intaasi ka dambeeya, lama bixin doono

- Laakiin haddii heer daryeel uu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay oo caafimaad ahaan ku habboon yahay qof ka diiwaangashan YSHCN, waxaa uu xaq u leeyahay dheefta xitaa haddii uu yahay 21 jir ama ka weyn yahay

## 17. Miyey tahay inaan cusboonaysiiyo dheefahayga YSCHN?

- Haa. Marka dheefahaaga caafimaad u diyaar yihiin cusboonaysiin, waxaanu boosta kuugu soo diri doonnaa waraaq. Waxay kuu sheegi in dheefaha si otomaatig ah loo cusboonaysiiyey ama waxay kuu sheegi haddaad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.

## 18. Sidee dib u cusboonaysiinta dheefaha YSHCN u shaqeysaa?

- Cusbooneysiintu waxay dhacdaa 2dii sanoba mar, ee maaha sanad walba
- Is-diiwaangeliyayaashu waxay sii wadanayaan u-qalmitaanka muddada 2da sano ah oo dhan
- Hannaanka dib u cusboonaysiinta ee onlaynka wuxuu ku lug leeyahay foom su’aaleed degdeg ah oo weydiinaya haddii shuruuduhu wali yihiin kuwo la buuxiyay
  - Hadday haa tahay: Dib-u-diiwaangalin toos ah
  - Hadday maya tahay: Waa inuu buuxiyaa codsi buuxa mar labaad
- Habka codsiga warqaddu waa la mid laakiin ka hawlgaliddu wax yar bay ka duwan tahay

## 19. Waa maxay sababta YSHCN u dhammaato?

- Dadka u qalma dheefaha Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah waa in loo cusboonaysiiyaa 2-dii sanaba mar. Hase yeeshee, maadaama barnaamijka kaliya loo heli karo kuwa da’doodu tahay 19 ilaa 25, cayminta dheeraadka ah ee YSHCN bixiso waxay dhammaataa markaad gaarto 26 jir. Waxaad u guuri doontaa barnaamij OHP Plus oo kale ilaa la gaaro wakhtiga laguu cusboonaysiin lahaa.

- Cayminta waxaa sidoo kale soo afjari kara sida inaad ka guurto gobolka, inaad si iskaa ah u codsato inaad iska joojiso cayminta, inaad maxbuus noqoto, ama inaadan lahayn baahi daryeel caafimaad ood ugu qalanto.

## 20. Miyaa YSHCN loo isticmaali karaa cayminta daryeelka muddada dheer?

- Adeegyada daryeelka muddada dheer qaarkood waa la caymin karaa haddaad leedahay (YSHCH). Haddaad su’aalo qabto, fadlan kala xiriir Adeegga Macmiilka ee ONE lambarka 1-800-699-9075 si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer (dhammaan wicitaanada gudbinta waa la aqbalayaa, caawimo ayaa lagu heli karaa luuqado badan).

## 21. Ma heli karaa YSHCN haddaan leeyahay caymin Healthier Oregon?

- Haa, haddaad hesho cayminta Healthier Oregon waxaad sidoo kale heli kartaa dheefaha Da’yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah.

## 22. Sidee baan jawaabo ku heli karaa haddaan qabo su’aalo dheeraad ah?

- Waxaad wax badan kaga baran kartaa barnaamijka YSHCN barta Oregon.gov/YSHCN. Haddaad xubin ka tahay CCO, waxaad toos ula xiriiri kartaa CCO-gaa gaarka ah. Cid kasta waa kala xiriiri kartaa Adeegyada Loo-adeegaha OHP 800-273-0557.

## 23. Ma jiraan xeerar ku saabsan wakhtiyada jawaabta adeegga? Ma jiraan wax ka mid ah xeerarka oo ku saabsan wakhtiga shaqada lagu qabanayo ee u dhexeeya codsiga taageerada iyo bixinta adeegyada?

- Waqtiyada cayimani waxay ku xiran yihiin adeegga mararka qaarkoodna waxay ku xiran yihiin bixiyaha

- Xeerar kala duwan ayaa u jira adeegyada kala duwan, gaar ahaan caafimaadka dhimirka
- Aadbaa loogu yaqaanaa waqtiyada cayiman kharashka loogu tala galay adeegga marka loo eego xeerarka gaarka ah ee CCO

---

Dukumintigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaadda farta waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala xiriir Adeegga Macmiilka OHP lambarka 800-699-9075. Dhammaan wicitaanada sii gudbinta ah waa la aqbalaa. Caawimo ayaa lagu heli karaa luuqado badan.

Waaxda Nidaamka Caafimaadka
Medicaid Programs
500 Summer Street, NE, E-35
Salem, OR 97301
Ask.OHP@odhsoha.oregon.gov
Oregon.gov/YSHCN

OREGON HEALTH AUTHORITY